



# Samayso Mid Kuu Gaar ah Baaquli Baacug/Jiiska Dhannaan ah

Xaddiga cuntada 1 | Waqtiga diyaarinta 5 daqiiqo. | Waqtiga guud 5 daqiiqo.

**Qalabka:** Baaquli, Weel hawadu geli karin

**Maacuunta:** Fargeeto ama qaaddo, Koobabka  
iyo qaaddooyinka cuntada lagu cabbiro

## Maaddoooyinka

### Baaquli Cunto Macaan ah

1 ukun oo isqbatta oo biyo lagu kariyay  
1/2 koob farmaajo la firay ah oo dufanku ku  
yar tahay oo 2% ah  
6 xabo yaanyo yaryar ah, la saafay  
1/4 qajaar ah, la saafay  
1 far-iyo-suul oo filfil ah

### Beeriga Buluuga ah iyo Yicibta

1/2 koob farmaajo la firay ah oo dufanku ku  
yar tahay oo 2% ah  
1/8 qaaddo shaah oo faniilaha (dhabta ama  
asalka ah) buddada ah (ikhtiyaari)  
1/4 koob cinabka (daray ah ama la  
barafeeyay) buluugga ah  
2 qaaddo oo yicib la saafay ah iyo yicib aan  
la cusbayn  
1 qaaddo shaah oo malab ah

### Kulaalah

1/2 koob farmaajo la firay ah oo dufanku 2% yahay oo uu  
ku yar yahay  
1/2 koob oo waslado cannanaas ah oo gasacadaysan oo  
casiir ku dhex jira, laga miiray  
1 qaaddo oo qumbe aan la macaanayn ah oo la saafay  
(ikhtiyaari)  
1/4 muus ah, la saafay

### Shukulaato Leh Lows

1/2 koob oo baacug/jiiska dhannaan ah oo dufanku ku yar  
yahay oo dhan 2%  
1 qaaddo shaah oo buddada kakaawga ah  
1 qaaddo shaah sonkor aan la sifayn ah  
1/8 qaaddo shaah oo faniilaha (dhabta ama asalka ah)  
buddada ah  
1 qaaddo oo lows la shiiday ah  
1/4 koob oo garanoola ah

## Tilmaamaha

1. Ka hor inta aadan hawsha bilaabin, dhaq gacmahaaga, sagxadaha, maacuunta, iyo miraha.
2. Ku rid jiiska furfuran gudaha baaquli yar oo ku xiji maaddoooyinka kale haray.
3. Ku qabooji baaquliga weel hawadu geli karin ilaa afar maalmood. Haddii aad isticmaalayso garanoola, ha sii diyaarin garanoolaha waqtii hore, sababtoo ah garanoolaha wuu qoyi doonaa. Haddii aad gurto garanoolaha, isla markiiba cun.

### Macluumaadka Nafaqada: (Baaquli Cunto Macaan ah)

Kalooriyada 190

Dufanka Guud 8g

Cusbada 410mg

Karbohaydaraydhka Guud 10g

Borotiinka 19g